



## **Forbud mot kvinnelig kjønnslemlestelse Mamnuucidda curyaaminta unugga taranka ee dumarka (somali)**

Dhammaan magangelyadoonayaasha ka yimaada dalalka ay curyaaminta unugga taranka ee dumarku ka jirto, waa in la siiyaa warbixin la xiriirta mamnuucidda sharciga norwiijigu uu mamnuucayo curyaaminta unugga taranka ee dumarka.

Curyaaminta unugga taranka ee dumarku waa qalliin lagu beddelo ama lagu gooyo bishimaha kore ee dumarka/gabdhaha, waana caado ka jirta meelo badan oo dunida ka mid ah. Dad badan ayaa curyaaminta unugga taranka ee dumarka waxay ugu yeeraan gudniinka dumarka.

### **Curyaaminta unugga taranka ee gabdhaha iyo dumarku waa ka mamnuuc Norway**

Curyaaminta unugga taranku waa mamnuuc maxaa yeelay waxay dhaawac u geysataa caafimaadka gabdhaha iyo dumarka. Curyaaminta unugga taranku waxay keentaa isbeddel waaraya, khatar caafimaad oo degdeg ah iyo khatarta loogu jiro dhibaatooyin kala duwan oo uu qofku la kulmo inta uu nool yahay oo dhan oo korodha. Dhammaan noocyada curyaaminta unugga taranka dumarku waa ka mamnuuc Norway, xataa marka wax yar la beddelo ama wax yar la gooyo. Xataa qalliinka inta badan loogu yeero sunnada laftigiisu waa khatar oo sidaas darteed waa mamnuuc.

Qofka fuliya ama ka qayb qaata in unugga taranka ee gabar ama qof dumar ah la curyaamiyo (la gudo), waxaa lagu xumumi karaa ciqaab xabsi ah oo gaaraysa ilaa toban sano. Tani waxay xataa khuseysaa haddii uu gudniinku ka dhaco dal kale oo weliba ay gabadhu ama qofka dumarka ahi iyadu oggolaatay. Gabadha ama qofka dumarka ah lama ciqaabi karo. Dadka lagu xukumay in ay ka qayb qaateen curyaamin unug taran ee dumar waxaa sidoo kale dhici karta in Norway laga tarxiilo.

Ka qayb qaadashada curyaaminta unugga taranka ee dumarka waxaa ka mid ah in warbixinno khalad ah si kas ah loo siiyo mas'uuliyiinta ama qofka la curyaaminayo, iyada oo ujeeddadu tahay in curyaaminta unugga taranku ay meel marto.



Gabdhaha iyo dumar badan ayaa la gudan ka hor intaysan Norway imaannin. Mamnuuc ma aha in la gudan. Waalidka waxaa laga rabaa in ay hubiyaan in gabdhahooda aan qaangaarin ee gudan in ay helaan caawinta caafimaad ee ay u baahan yihiin.

### **Deeq lagu caawinayo gabdhaha iyo dumarka la curyaamiyay unuggooda taranka**

Mas'uuliyiinta norwijigu way caawinayaan gabdhaha iyo dumarka la curyaamiyay unuggooda taranka ama kuwa ka baqaya in sidaas lagu sameeyo. Gabdhaha iyo dumarka gudan waxay xaq u leeyihiin in loo fidiyo caawin caafimaad.

Haddii aad u baahan tahay warbixin intan ka badan oo ku saabsan mamnuucidda sharciga ama meesha aad caawin ka heli kartid, waxaad la hadli kartaa shaqaalaha Waaxda agaasinka ajnebiga (UDI) ama kuwa xerada qaxootiga. Waxaad sidoo kale la hadli kartaa dhakhtar ama kalkaaliso caafimaad (helsesøster), ummuliso ama isbataalyaraha dumarka (kvinneklippen) ee ku dhex yaalla isbataalka meesha aad deggan tahay. Caawinta caafimaadku waa bilaash, shaqaalaha caafimaadkana waxaa saaran waajib xog qarar.

## **Forbud mot kvinnelig kjønnslemlestelse**

Kjønnslemlestelse av jenter og kvinner er et inngrep som endrer eller fjerner de ytre kjønnsdelene, og er en tradisjon flere steder i verden. Mange kaller kjønnslemlestelse for omskjæring.

### **I Norge er det forbudt å kjønnslemleste jenter og kvinner**

Kjønnslemlestelse er forbudt fordi det er skadelig for jenters og kvinners helse. Kjønnslemlestelse medfører varige endringer, akutte helsefarer og økt risiko for ulike plager gjennom hele livet. I Norge er alle former for kvinnelig kjønnslemlestelse forbudt, også der bare litt fjernes eller endres. Inngrep som ofte kalles sunna er også skadelig og derfor forbudt.

Den som utfører eller medvirker til at en jente eller en kvinne blir kjønnslemlestet, kan få fengselsstraff i inntil ti år. Dette gjelder også hvis omskjæringen skjer i et annet land og selv om jenta eller kvinnen samtykker. Jenta eller kvinnen selv kan ikke straffes. Personer som blir dømt for medvirkning til omskjæring kan også bli utvist fra Norge.

Som medvirkning til kjønnslemlestelse regnes blant annet bevisst å gi uriktige opplysninger til myndighetene eller til personen som skal omskjæres, hvis hensikten er å gjennomføre kjønnslemlestelsen. Mange jenter og kvinner ble omskåret før de kom til Norge. Det er ikke forbudt å være omskåret. Foreldre må sørge for at mindreårige døtre som er omskåret får nødvendig helsehjelp.

### **Hjelpetilbud til jenter og kvinner som er kjønnslemlestet**

Norske myndigheter skal hjelpe jenter og kvinner som har blitt eller frykter å bli kjønnslemlestet. Jenter og kvinner som er omskåret har rett til å få helsehjelp.

Hvis du trenger mer informasjon om lovforbudet eller om hvor du kan få hjelp, kan du snakke med ansatte i UDI eller på asylmottaket. Du kan også snakke med en lege, helsesøster, jordmor eller kvinneklinikken på sykehuset der du bor. Helsehjelpen er gratis og helsepersonell har taushetsplikt.

### **Har du forstått informasjonen?**



## Forbud mot kvinnelig kjønnslemlestelse Mamnuucidda curyaaminta unugga taranka ee dumarka (somalí)

Informasjonsskriv / Qoraal warbixin ah

[UDI 2014-041](#), [www.udiregelverk.no](http://www.udiregelverk.no)

### Ma fahantay warbixinta?

Jeg har forstått informasjonen / Waan fahmay warbixinta.

Søkerens navn og DUF-nummer /  
Magaca iyo lambarka DUF ee codsadaha

Sted og dato / Goog iyo taariikh

Underskriften til søkeren <sup>1</sup> / sixiixa codsadaha <sup>2</sup>

Jeg bekrefter å ha gitt informasjon / Waxaan caddaynayaa in aan ku wargeliyey.

Underskriften til medarbeideren/saksbehandleren /  
sixiixa shaqaalaha/kiis-hayaha

Eventuelle merknader / wixii faallo ah

---

<sup>1</sup> Asylsøkere under 18 år skal ikke undertegne informasjonsskrivet, men bekrefte muntlig om informasjonen er forstått.

<sup>2</sup> Magangelyadoonayaasha ka yar 18 sano ma saxiixayaan qoraalka warbixinta ah, laakiin afka ayay ka xaqiijinayaan in ay warbixinta fahmeen.